Danwadaagta U-doodista Qoyska ee OCECD & DRO: Dhimista Daalka Gudbinta iyadoo la isku dubaridayo Taageerada Qoysaska Ohio ee Dhex Mushaaxidda Waxbarashada Gaarka ah

Xuquuqda Naafada Ohio (DRO-Ururka Ilaalinta iyo U-doodida ee Ohio) iyo Isbahaysiga Waxbarashada Carruurta Naafada ah ee Ohio (OCECD-Xarunta Macluumaadka iyo Tababarka Waalidka ee Ohio) waxay ka caawiyaan qoysaska inay dhex mushaaxaan geedi-socodka waxbarashada gaarka ah. Si loogu adeego qoysaska Ohio si ka sii wanaagsan, DRO iyo OCECD waxay si wadajir ah uga shaqayn doonaan sidii qoysaska loogu gudbin lahaa hay'adda sida ugu wanaagsan uga caawin karta inay qoysasku si dhakhso ah u helaan gargaarka ay u baahan yihiin si la isaga ilaaliyo daalka gudbinta.

Waa ayo DRO

DRO waa urur aan faa'iido-doon ahayn oo ka hawlgala gobolka oo dhan oo bixiya qareemid, macluumaad, iyo gudbinta dadka naafada ah. DRO waxay leedahay qareeno iyo u-doodayaal kuwaasi oo ka caawin kara qoysaska geedi-socodka waxbarashada gaarka ah. Adeegyada DRO waa bilaash mana jiraan shuruudo u-qalmitaanka dakhliga ah si loo helo adeegyada. DRO waxay qoysaska siisaa adeegyo heerar kala duwan leh iyadoo ku xiran arrinta iyo kheyraadkayaga. Adeegyada la bixiyo waxay kala noqon karaan macluumaad iyo tixraacyo ilaa kaqaybgalka kulamada iyo matalaadda.

Waa ayo OCECD

OCECD waa urur aan faa'iido-doon ahayn oo ka hawlgala gobolka oo dhan una heellan horumarinta danaha waxbarasho ee carruurta iyo dhallinyarada naafada ah laga bilaabo dhalashada ilaa 26 jir. OCECD waxay leeyihiin khabiiro macluumaad oo ka caawin kara qoysaska inay fahmaan geedi-socodka waxbarashada gaarka ah. Adeegyada OCECD waa bilaash mana jiraan shuruudo u-qalmitaanka dakhliga ah si loo helo adeegyada. OCECD waxay qoysaska siisaa la-talin, tababaro, taageero farsamo, iyo taageero IEP.

Ururkee ayaa ugu fiican inuu ku caawiyo (Kaalimo kala duwan iyo yoolal la wada wadaago)

Iyadoo ku xiran xaaladdaada iyo walaacyada dugsigaaga, DRO ama OCECD ayaa laga yaabaa inay ku habboon yihiin in ay ku caawin karaan. DRO iyo OCECD, haddii ay haystaan oggolaanshaha waalidka, waxay si wadajir ah uga wadashaqayn doonaan go'aaminta hay'adda ugu habboon ee ku caawin karta, waxayna raaci doonaan geedi-socod lagu hubinayo in si hufan ay hay'adba tan kale ugu wareejiso ama ugu gudbiso qofka. Geedi-socodkan waxaa loo dejiyay si wax looga qabto daalka waalidiinta ay inta badan dareemaan marka loo gudbinayo hay'ad kale si ay u caawiso.

OCECD iyo DRO waxay leeyihiin geedi-socod u gaar ah oo ay ku go'aamiyaan heerka caawimaad ee ay siin karaan qoysaska. Heerkaasi caawinta wuu kala duwanaan doonaa iyadoo ku xiran xaaladdaada gaarka ah iyo arrimaha degmo dugsiyeedkaaga. Heerka caawimaada sidoo kale wuu kala duwanaan doonaa iyadoo ku xiran kheyraadka hay'adda ee la heli karo.

DRO marka laga hadlayo, heerarka gargaarku waxay u dhexeeyaan laga bilaabo bixinta macluumaadka iyo gudbinta, la hadalka degmo dugsiyeedkaaga, kaqaybgalka IEP iyo kulamada kale ee dugsiga, ka caawinta gudbinta cabashooyinka, iyo ku matalidda geedi-socodka sharci ee suuban. Adeegyada OCECD waxay kala yiiin la-tashiyo, kaalmo farsamo, iyo kaqaybgalka kulamada IEP.

Waxa ay tahay in laga fisho geedi-socodka gudbinta



Marka waalid ama mas'uul uu la xiriiro DRO ama OCECD, hay'aduhu way wadashaqeyn doonaan haddii ay u gudbinta ururka kale ay habboon tahay. Hay'adda aad la xiriirtay ayaa kuu sheegi doonta in gudbin la sameyn doono. Ogolaanshahaagu waa lagama maarmaan si loo sameeyo gudbinta sidaas darteed waxaa lagu siin doonaa dokumeenti aad saxiixdo kaasi oo siin doona oggolaanshahaaga hay'adaha si ay u wada hadlaan oo ay u sameeyaan gudbin ayna uga wada hadlaan xaaladdaada. Haddii aadan bixinin oggolaanshahaaga, gudbin ma dhici doonto.

Haddii aad bixiso oggolaanshahaaga, hay'adda gudbinta samaynaysa waxay siin doontaa hay'adda kale macluumaadka aad horay u bixisay si aadan sheekadaada mar kale ugu sheegin hay'adda kale. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad fududaato hawsha oo aad si dhakhso ah u hesho caawimaada aad u baahan tahay. Oggolaanshahaaga awgiis, hay'aduhu waxay sii wadi doonaan inay isgaarsiiyaan xaaladdaada iyo inay midba midka kale is-caawiyaan marka loo baahdo si ay gacan uga geystaan kiiskaaga. Geedi-socodkan ayaad ku lu yeelan doontaa si aad u ogaato waxa dhacaya, oo had iyo jeer waxaad awoodi doontaa inaad la wadaagto wixii macluumaad dheeraad ah.

Hay'aduhu way kula soo xiriiri doonaan si aad u ogaato hay'adda hagaysa caawintaada.

- **Cinwaanka:** 125 Executive Drive, Suite 200 Marion, OH 43302
- **Telefoonka:** 844-382-5452
- **Iimaylka:** ocecd@ocecd.org

- **Cinwaanka:** 200 Civic Center Drive, Suite 300 Columbus, Ohio 43215
- **Telefoonka:** 614-466-7264 or 800-282-9181
- **Iimaylka:** communications@disabilityrightsohio.org

Mashruucan waxaa qayb ahaan taageeray Golaha Naafonimada Koriinka ee Ohio, iyadoo la adeegsanayo deeqda lambarkeedu yahay 26OU01FA26 ee laga helay Maamulka Maraykanka ee Nolosha Bulshada, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Washington, D.C. 20201. Deeq-qaatayaasha fulinaya mashaariicda ay dawladdu kafaalo qaado waxaa lagu dhiirigelinayaa inay si xor ah u sheegaan natiijooyinkooda iyo gunaanadkooda. Aragtiyada ama ra'yiyada, sidaas darteed, ma matalaan siyaasadda rasmiga ah ee ACL.